



### Gu'ga-Jiilaalka 2011

Dugsiga sare ee Lincoln, waa Dugsiyadii ugu horeeyey ee Dugsiyadda Guud ee Portland, waxa uu dhacaa farasmagaalaha Portland, adiga oo si gaaban ugu socon kara Portland State University, matxafka, bandhig dhaqameedyadda iyo carwooyinka.

Mid ka mid ah 100ka barnaamij ee ugu sareeya ee udiyaargarowga kuliyadaha (IB) ee dugsiga sare ee Maraykanka oo idin, Lincoln waxay dadaal ugu jirtaa meelaynta Daraasadaha Caalamiga ah iyo barnaamijyadda Spanish-ka bilowga ah.

Ardayda Lincoln —Ee ka yimid ama leh khalfiyad dhaqanno iyo dhaqaale kala duwan-ayaa si dhiifoon oga qayb qaadanayaa ka fekirka xaaladaha dunida ee ay ku noolyihiin. Marka lagu daro, ka qayb qaadashadda ardayda 6 ciyaaraha ah, iyagga oo martigeliya naadiga ciyaaraha iyo qaar kala duwan oo ka qayb qaadahsadda manhaj dheeri ah oo macne buuxa xambaarsan iyo barnaamijyadda adeegyadda beesha.

*“Way wanaagsan tahay in aad dhiifoontahay, oo aad oga qayb qaadato si garaad dheeri leh Lincoln. Aradyeenu waxa ay ka qaataan faa’ido fursadaha, bii’aduna waxay barataaraysaa danhooda barasho” — Peyton Chapman, maamulaha Lincoln.*

### Macluumaadka Barnaamijka

- Darasadda Caalamiga ah oo ay udub dhexaad u tahay luqadaha dibadda iyo arimaha caalamiga ah. Halka uu Lincoln ku yaalo waa ay ku haboontahay barashadda khibaradda in badan oo ka mid ah dhanka dunida ee beesheena.
- Lincoln waa barnaamij (IB) oo la ansixiyey islamarkaana diyaar u ah in uu ardayda u diyaariy shahaadada IB.
- Adeegyadda waxbarashadda gaadhka ah waa la bixiyaa iyadii oo ay barataarayaan barnaamijyo balaadhan oo ku salaysan baahida ardayda.
- Caawinaad gooni ah iyo barnaamijyo gaadh ah oo loogu talagalay ardayda luqadooda Ingiriisidu xadidantahay. Barnaamijka Spanish-ka ee bilowga ah ayaa isaguna ay udub dhexaad utahay horumarinta ardayda iyadii oo la adeegsanayo luqadda Spanish-ka iyadii oo daraasad qaabaysan ah.
- Lincoln also offers language classes in Arabic, French, German and Mandarin Chinese. Lincoln sidoo kale waxa uu bixiyaa fasalado luqadda carabiga ah, French, German iyo Mandarin Chinese
- Ardaydu waxay kaga boogan doonaan barnaamijyo waasic ah marka lagu daro kuwa aan qasabka ahayn: Jazzka, cilmiga banii’adamka, daraasadda bii’adda, akhrinta farshaxanka. qalabka warbaahinta, hal-abuurka aqaladda internet-ka

### Macluumaadka Dugsiga.

2011-12 isdiiwaangelinta: 1,476

Astaanta dugsiga: Cardinal

Midabka dugsiga: Casaan iyo cadaan

### Baro Dugsiga Sare ee Lincoln

Habeenka qoyska fasalka-sideedaad, 6 fiidnimo, Feb. 9

### Nashaadka iyo Ciyaaraha Fudud

Ardayda Lincoln waxay ka qayb qaataan howlo manhaj dheeri ah oo kala duwan-laga bilaabo barnaamijyo ciyaareed oo najaxay illaa iyo ka qayb qaadashadda iyo ka helida howlahaa iyo naadiyadda.

- Dugsiga Sare ee Lincoln waxa uu ku hogaaminayaa heerka Oregon 6A. ee orodka gaaban, xeedhadda, orodka dheer, golf-ka, iyo barafka lagu cararo, dabaasha, barnaamijyada ciyaaraha waxay bixinayaan fursado balaadhan oo xagga ciyaaraha ardaydau ay danaynayaan.
- Ardayda ka qayb qaadanaya naadiyadda. Qaar waxay xooga saarayaan adeegyadda beesham waxbarashadda kale ama farshaxanka; dhamaantood waxay isku xidhayaan faham gudo balaadhan oo dhexmara Dugsiga Sare ee Lincoln iyo ardaydiisa..

### Caawinadda Bulshadda

Lincoln waxa uu ka faa’iidayaa ka qaybqaadashadda waalidiinta, ardayda dugsiga ka baxday, deriska iyo

xubnaha beesha. Sanadkan oo keliya Lincoln Foundation waxay bixisay 4½ oo boosas macalinnimo ah. Sanadan keliya The Lincoln Foundation waxa uu bixiyey ku dhawaad dhaqaalaha 5 macalin oo dheeri ah.

“Ruuxda dugsiga Lincoln, fursado waxbarasho oo wanaagsan iyo goob aad oga duwan goobaha kale oo waxa ay dhinaca ku haysaa faras magaalaha taa ayaa ka dhigaysa goob barasho oo aad usaraysa.” **Max Lehman, ku dhow qalinjebinta.**

**Macluumaad dheeri ah ka eeg aqalka dugsiga Lincoln [www.pps.net/shschools/lincoln](http://www.pps.net/shschools/lincoln)**

**Dugsiyada Dadweynaha ee Portland waa fursado shaqaaleeyn iyo barasho loo simanyahay.**

